



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS Home-based Distance Learning

Waxbarasho Guriga Lagu Qaadanayo

Ardayda iyo Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Waxaan ku jirnaa dhibaato caafimaad oo baahsan oo geyru caadi ah bulshadeenu, ayadoo COVID-19 uu nagu qasbayo inaan wax ka baddalno nolosheena iyo maciishadeena si aad ah oo weyn, taasoo ay kujirto iskooladeenu in muddo dheer ay xirnaadaan. Iskooladu aad ayay muhiim ugu yihiin ardayda, qoysaska, macalimiinta iyo bulshooyinka. Iskoolka Dawlada ee Portland Public Schools waxaa uu diiradda saaray saddexdii asbuuc ee ugu dambeeyay inuu badbaadsho ardaydeena iyo shaqaalaheena, uuna fursad usiiyo sidii ay u heli lahaayeen adeegyo muhiim ah sida cunto iyo taageero caafimaad oo maskaxiyah ah.

Waxaan sii wadi doonaa shaqada muhiimka ah, hadana waxaanu u sawireynaa qaabka waxbarasho anagoo ka baddalayna mid fasal lagu dhigto, una rogeyna mid internetka lagu bixiyo. Waxaanu samayn doonaa dadaal kasta si aanu ugu sii xirnaano ardaydeena waxaana dadaalkeena ugu wanaagsan aan u samayneynaa inaan dhiirigalino fursad sii socota oo macalimiinteena wax looga barto. Waxaan idinka dalbeynaa sabir inta aanu uga rogeyno iskoolkii ka dhisnaa bulukeetiga iyo shamiitada mid wax looga barto internetka ayadoo guriga la joogo.

Hoos waxaa aad ku arki doontaa xog muhiim ah oo ku saabsan barnaamijka waxbarashada aanu bixinayno ee la qaadanayo ayadoo guriga la joogo, PPS-HD. Waxaanu ku salaynay barnaamijkaan daryeel, bulsho iyo dib u soo celinta heerka sii wadidda waxbarashada, waxaana ka jawaabi doonaa su'aalo badan durba.

Waxaanu fileynaa inaan xiriir la yeelanyo ardaydiina maalmaha soo socda!

FAAHFAAHIN DHEERAAD AH HADII AAD DOONEYSO, FADLAN BOOQO [PPS.NET/CORONAVIRUS](https://pps.net/coronavirus) IYO [PPS.NET/STUDENT](https://pps.net/student)

<p>Waa maxay PPS-HD?</p>	<p>PPS-HD waa barnaamij wax la barto ayadoo guriga la joogo internetkana ku baxa kaasi oo loogu tala galay in lagu taageero baahiyaha waxbarasho iyo kuwa dareenka bulsho ee ardayda maadaama dhismeyaasha degmadu ay xirnaanayaan ayadoo sababtu tahay COVID-19 iyo sidii looga feejignaan lahaa. Waxaa uu la jiraa barnaamijku talada laga helay Waaxda Waxbarashada ee Oregon waxaana uu bixiyaa sidii lagu heli lahaa agabyo waxbarasho ayadoo la adeegsanayo qaabab badan, sida fasal internetka wax looga barto iyo tilmaameyaal waxbarasho oo warqado ku qoran. Taageero toos ah iyo talo ayaa laga dhigayaa mid laga heli karo pps.net/student.</p> <p>Qorshaha PPS-HD waxaa ku jira manhaj heer fasal ah iyo maado loogu talo galay inay sii waddo bixinta tilmaamaha iyo ku hawlinta waxbarashada ardayda ayadoo la adeegsanayo aaladda Chromebooks, kombuyuutaro, laabtooby, aaladaha tabletska, iPadska ama talefanada smartphones-ka.</p> <p>Hada markii aanu u rogeyo waxbarashada aanu bixino mid meel fog ayadoo ardaydu joogaan internet lagu siin karo, PPS-HD, sida dhammaan borogaraaminta PPS, waxaa uu ku salaysnaan doonaa daryeel, busho, iyo sii wadidda waxbarashada. Waxaanu sidoo kale ka shaqeyneynaa sidii aan ku bixin lahayn nuqulo warqad ah oo casharro ah iyo leyliyo lasiinayo ardayda.</p>
<p>Goormuu bilaabanayaa?</p>	<p>Waanu bilownay! Asbuucaan (3/30-4/3) macalimiintu waxay isku hawlinayeen daraaseynta horumarinta xirfadeysan ee ku saabsan sida ugu wacan ee loo dabooli karo baahiyaha ardayda ku jira biiio waxbarasho oo fog ama ka fog iskoolka ama macalimiinta.</p> <p>Asbuuca xiga (4/6-4/10) macalimiintu waxaa ay bilaabi doonaan inay ardaydiina lasoo xiriiraan. Isniinta iyo Talaadada, waxaad filan kartaan emailo iyo codsiyo kasocda macalimiinta, la-taliyeyaasha iyo maamuleyaasha lasoo xiriiraya ardayda guudmarna ku samaynaya wadaniyadda dhanka dhijitaalka ah iyo waxyaabaha la filayo; Arbacada iyo Khamiista bareyaasha ayaa laga yaabaa inay bilaabaan casharada, leyliyada iyo kulamada fasalka ee internetka ku baxaya. Fulinta waxbarashada la qaato ayadoo meel fog iskoolka laga joogo oo buuxda (casharo maalinle ah, la hadlidda bareyaasha, hawlo la qabto ayadoo internetka la adeegsanayo ama mashaariic) leh jadwalo joogto ah waxaa ay bilaaban doontaa asbuuca ku taariikheysan 13 Abriil.</p>

	<p>Inta waqtigaan adag lagu jiro oo dhan, fadlan ogsoonow in ka bareyaal dhiirran ahaan inaanu mar waliba ahmiyadda siin doono xiriirka iyo xiriirada lala yeelanayo ardayda ee ku saabsan waxyaabaha la filan karo ee dhanka waxbarashada ah.</p>
<p>Maxaa ayuu ardaygaygu u baahan yahay si uu uga qeybqaato?</p>	<p>Si ay uga qeybqaataan PPS-HD, ardaydu waxay u baahnaan doonaan:</p> <ol style="list-style-type: none"> 1. Aalad internet lagu xiriirin karo. 2. Internet inay heli karaan. <p>WAA MUHIIM: Ardaydu inay eegaan emailadooda PPS Gmail si ay tilmaameyaal uga helaan kuwaasi oo ku saabsan sida loo bilaabay PPS-HD. Hada, dhammaan ardayda PPS ee dugsi sare waxay leeyihiin cinwaano emailo ah oo ah @student.pps.net, PPS-na waxaa uu bilaabi doonaa hannaanka lagu abuurayo cinwaano emalo ah oo ah @student.pps.net kuwaasi oo loogu talo galay dhammaan ardayda dhigta fasalada heerka 4-8 kuwaasi oo leh borotakoolo badbaado. Taageero toos ah iyo talo ayaa laga heli doonaa pps.net/student.</p>
<p>Maxaa la yeelayaa hadii internet uusan noogu jirin guriga?</p>	<p>Waxaanu ka shaqeyneynaa inaan internet siino qoysaska u baahan. Haddii aad u baahan thay internet, fadlan buuxi foomka codsiga, oo aad ka heli karto pps.net/coronavirus. Xogta ku taala bartaan waxaa lagu soo bandhigay PPS ayadoo ku dhigan lix luuqadood si ay kuugu sahlanaato oo aad ugu aqrisato luuqada aad fahmeyso.</p>
<p>Guriga kombuyuutar nooma yaalo. Ardaygaygu wali ma ka qeyb qaadan karaa?</p>	<p>PPS waxaa uu u keenayaa aalado ardayda u baahan waqtigaan inta lagu jiro. Haddii ardaygaagu uusan guriga ku heysan kombuyuutar, fadlan buuxi foomka codsiga, oo aad ka heli karto pps.net/coronavirus, ama aad barta qeybinta raashinka Adeegyada Nafaqeynta (goobaha barta waxaa ay ku liis gareysan yihiin pps.net/coronavirus) oo buuxi qiimeyn warqad dusheed ah. Qiimeyntu waxaa ay ku qoran tahay dhammaan luuqadaha lixda ah ee PPS.</p>
<p>Intee ayaan waqti guriga joogayaa si aan ugu caawiyo ardaydeyda inay barnaamijka ka qeybqaataan?</p>	<p>Arintaasi waxay ku xiran tahay da'da ardaygaaga. Badi hawlaha dhammaystirka ah waxaa ay ahaanayaan kuwo ay garwadeen ardaydu ka yihiin, laakiin ardayda qaarkood waxaa laga yaabaa inay faaiido ka helaan ka qeybqaadashadaada, sharraxaada iyo dhiirgalinta aad siinayso. Ardayda qaba baahiyaha gaarka ah waxaa lagaaga baahan yahay inaad siiso jiheyn iyo taageero dheeraad ah.</p>
<p>Imisa saacadood ayaa maalin walba ardaygeygu u baahan yahay inuu khadka internetka kujiro?</p>	<p>PPS-HD waxaa uu raacayaa Waxbarashada Ayadoo Iskoolka Laga Fog Yahay Dhammaan Tilmaameyaasha oo Dhan kuwaasi oo ay bixisay Waaxda Waxbarashada ee Oregon. Waxbarasho macalini garwadeen ka yahay waxay ku kala duwanaaneysaa fasalada heerarka kala duwan, waxaana anagu dhammaystireynaa jadwal u samaynta talo-bixinada hada.</p>

	<p>Waqtiyada lasoo jeediyay ee khatka internetka loo cayimay uma baahna inay hal mar wada noqdaan. Waxaa laga dhigi karaa hadba in yar in internetka lagu qaato intii loo baahan yahay hadba. Waxaa lagu talo bixiyay in ardaydu ay waqti ku filan u helaan “nasinta maskaxda” iyo iskala bixinta.</p>
<p>Ma samaynaysaa isxaadirin, yaa qaatay oo soo galay khatka iyo yaa ka maqnaa?</p>	<p>Waqtigaan, waxaanu qorsheyneynaa inaan adeegsano isxaadirin internetka ah oo la xisaabay inta soo gashay arday iyo inta aan soo galin taasi oo ah aalad lagu xaqiijinaayo in ardaydu ay awoodaan inay ku tixnaadaan barnaamijkeena waxbarasho.</p>
<p>Miyaa shaqada darajooyin lakala siinayaa?</p>	<p>Darajooyin lama siin doono ardayda K-8, laakiin bareyaasha ayaa dusha kala socon doona horumarka ardayga ee ku aaddan la qabsashada heerarka ayadoo taa loo marayo qiimeyn aan rasmi ahayn.</p> <p>Ardayda dhigta fasalada 9-12, dhammaantood waxaa fursad loo siin doonaa inay horumariyaan darajadooda loogu talo galay saddexda bilood ee seddexaad ee sanadka ayagoo la shaqeynaya bareyaashooda si ay u dhammeeyaan shaqada soo hadhay. Marna arday ma helayo darajo hoose marka loo eego taariikhda aanu iskoolka xirnay. Waxaanu kusii baahin doonaa saddexda bilood ee saddexaad ee sanadka ilaa 13ka Abriil. Ardayda aanan awoodin inay shaqada ku dhammeeyaan saddexda bilood ee seddexaad ee sanadka waxaa lasiin doonaa darajo Aan Dhammaystirnayn. Ardaydu waxay fursad u heli doonaan inay xalliyaan wixii darajooyin ah ee aanan dhammaystirnayn markii iskoolada dib loo furo.</p> <p>Inta soo hartay ee sanad dugsiyeedka, ardayda fasalada 9-12 waxaa laga filayaa inay dhammaystiraan leyliyada ayagoo khatka internetka adeegsanaya ama warqad arintaasi oo sida ay u socoto uu barehoodu dusha kala socon doono. Waxaanu taladii ugu dambaysay ka sugaynaa ODE taasi oo la xiriirta sharuudaha qalinjabinta si loo garto bal in darajooyin lasoo saarayo iyo in kale kuwaasi oo loogu talo galay saddexda bilood ee afaraad ee sanadka.</p>
<p>Sidee bareyaashu ula soo xiriirayaan ardayda?</p>	<p>Apps-ka la ansixiyay ee loogu talo galay bareyaasha iyo la-taliyeyaasha si ay ula soo xiriiraan ardayda ayaa waxay yihiin: XASUUSI/REMIND (koolal taleefan) iyo Google MEET (shir fiidiyow ah) Ardayda ayaan u baahan doonin inay soo dejistaan ama soo download gareeyaan amaba helaan REMIND, maadaama ay u shaqeyn doonto sidii fagaare bareyaashu ay koolal taleefan ku sameeyaan.</p> <p>Waxbarashada la qaato ayadoo laga fogyahay iskoolka nidaamyada lagu maareeyo ee bareyaasha iyo ardaydu ay isticmaali doonaan waa SeeSaw oo loogu talo galay fasalada K-2 iyo Google Classroom ama Canvas oo loogu talo galay fasalada 3-12. (*Ardayda isticmaala IEPs waxay adeegsan karaan nidaamyo kale oo waxbarashada lagu maareeyo)</p>

	<p>Hada, dhammaan ardayda PPS ee dugsi sare waxay leeyihiin cinwaano email oo ah pps.net, oo PPS ayaa bilaabi doona hannaanka lagu abuurayo cinwaano email oo ah pps.net kuwaasi oo loogu talo galay dhammaan ardayda fasalada 4-8 kuwaasi oo leh borotakoolo badbaado. Taageero toos ah iyo talo ayaa laga dhigi doonaa mid laga helo pps.net/student.</p> <p>Ikhtiyaarka ka noqoshada xiriirka fool-ka-foolka ah ee u dhexeeya ardaygaaga iyo shaqaalaha dhismaha wuu soo fool leeyahay. Haddii aad doorato inaad ka noqoto xiriirka fool-ka-foolka ah, ardaygaagu weli wuxuu awoodaa inuu helo waxbarashadiisa isagoo u maraya dagalada barashada ee onlaynka ah.</p>
<p>Miyaa barnaamijka guriga lagu qaadanayaa dhammaan wixii la qaadan lahaa hadii aan iskoolka la xiri lahayn?</p>	<p>PPS-HD laguma qaadan doono wax kasta oo ay samayn lahaayeen bareyaasha iyo ardaydu caadiyan markii ay joogaan biio fasal oo caadiyan leh jadwal buuxa. Ayadoo dadaal kasta loo samaynayo sidii loo siin lahaa fursad hodan ah oo waxbarasho ardaydeena, ayaan waxaan sidoo kale garowsanahay in waxbarasho guriga lagu qaato ayadoo laga fogyahay iskool aysan baddali karin in ardaygu toos wax uga barto macalin waxna uu toos ula barto arday kale fasalka gudihiisa. Waxaan yeeli doonaa sida ugu wacan si aan ugu abuurno ardaydeena faham aad looga fakaray oo macno weyn leh. Waxaanu diirada saareynaa xiriirka lala yeelanayo ardayda waxaana samayneynaa hawlin joogto ah oo dhanka waxbarashada iyo tacliinta ah. Macalimiinteenu waxay diyaar u yihiin inay ka shaqeysiiyaan nidaamkaan aan la fileyn ee geyrucaadiga ah si uu si wanaagsan ugu shaqeeyo dhammaan ardayda, laakiin ma awoodi doono inaan si buuxda u soo saarno wixii ardaydu ay ku qaadan lahaayeen simister caadi ah.</p>
<p>Maxaa la yeelayaa hadii aan heyno in ka badan hal arday oo isticmaala PPS kuwaasi oo guriga jooga? Miyay tahay inay hal mar soo wada galaan internetka?</p>	<p>Ardaydu caadiyan waxay helayaan waqti ku filan inta badana waxay heli doonaan xulashooyin badan oo loogu talo galay marka ay u baahdaan inay khatka soo galaan.</p>
<p>Ma la xiriiri karnaa la-taliye ama shaqaale bulsho hadii ardaygeygu u baahan yahay caawimaad ka baxsan waxbarasho?</p>	<p>Haa. Qoysaska waxaa lagu boorinayaa inay email usoo diraan qeybta taageerada ee iskoolkooda ee caadiga ah, degmada maamulkeeduna wuxuu ka shaqeynayaa sidii uu ku abuuri lahaa siyaabo loogu talo galay ardayda iyo qoysaska si ay awood ugu yeeshaan inay soo wadaan shaqaalaha iskoolka ee ay u baahan yihiin. PPS waxaa uu la shaqeynayaa shiriik cusub oo xagga xiriirka ah ama khadka, laguna magacaabo REMIND, si uu u taageero hawlinta ardayga iyo qoyska iyo khusuusiyaatka shaqaalaha.</p>

<p>Ilmahaygu wuxuu leeyahay IEP. Sidee ayaa loo hirgelin doonaa?</p>	<p>IEP-yada wakhtigan waxa lagu fulin doonaa xuduudaha foormaatyada barashada onlaynka ah. IEP-yadu u baahan maayaan wax-ka-baddal amase isbaddal meelaynta ah si loo helo barashada onlaynka ah.</p> <p>Kulmada IEP ayaa la siin qoysaska maadaama ay marayaan dib-u-eegis sanadle ah. Maareeyaha kiiskaaga ayaa ku ogaysiin doona kuna waydiin inaad oggoshahay inaad kulanka ku qaadata onlayn.</p> <p>Waxbaris si gaar ah loo qaabeeyey ayuu taageeri doonaa maareeyaha kiiska ilmahaagu si loo waafajiyo waxbarista ardayda oo dhan la siiyo. Adeegyada IEP qaarkood waxa dhici karta inaan la bixin iyada oo ay ugu wacan tahay xaqiiqda ah in ardayda oo dhan ay ku helayaan heerar kala duwan oo waxbaris, taageero iyo adeegyo ah onlayn. Dadaalka ugu badan ayaannu u gali si aannu u caawinno taageeridda qoysaska inta wakhtigan lagu jiro waxaanannu siin waafajinno, galaangal-u-yeelashada waxbarista iyo taageerooyin si aannu idiin caawinno.</p> <p>Adeegyada tarjumaanka ee kulamada IEP-ga waxa lagu heli doonaa taleefan ama maqal iyo muuqaal, iyadoo ku xiran luuqadda.</p>
<p>Ilmahaygu wuxuu leeyahay qorshaha 504. Sidee waafajinaha loo siin doonaa muddada barashada onlaynka ah?</p>	<p>Macallinka ilmahaaga ayaa dib u eegi doona waafajinta daruuriga ah ee helitaanka iyo kaqaybqaadashada barashada onlaynka ah. Maareeyaha kiiska 504 ee ilmahaaga ayaa diyaar ahaan doonaa si uu uga taageero shaqaalaha dugsiga hirgalinta 504. Adeegyada tarjumaanka waxa lagu heli doonaa taleefan ama maqal iyo muuqaal, iyadoo ku xiran luuqadda.</p>
<p>Ilmahaygu waa Arday Luuqadda Ingiriisida. Sidee ayuu u heli doonaa adeegyada?</p>	<p>PPS wixii ay karto way samayn si ay u siiso adeegyada horumarinta luuqadda Ingiriisida dhammaan Ardayda barata Ingiriisida wakhtigan. Macallimiinta Horumarinta Luuqadda Ingiriisidu waxay:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● la shaqayn macallimiinta fasalka ee ardaygaaga si ay u taageeraan baahiyihiisa luuqadda ee barashada maalinlaha ah ● gacan ka gaysan la socoshada waxqabadka ardaygaaga ee barnaamijkiisa barashada onlaynka ah ee shakhsiga ah ● diyaar u ahaan wicitaanada taleefanka iyo iimeylada dhexmaraya iyaga, iyo adiga iyo ardaygaaga si ay idiin taageeraan.
<p>Cunugeygu wuxuu leeyahay IEP. Sidee ayuu ku helayaa adeegyo miyaana yeelan doonaa shir kusaabsan IEP?</p>	<p>Shirarka IEP waxaa la siin doonaa qoysaska markii ay u yimaadaan dib u eegidda sanadlaha ah. Maareeyaha kiiskaaga ayaa kusoo wici doona waxaana uu ku weydiin doonaa in aad aqbashay inaad uga qeybqaadato shirka internetka.</p> <p>Arinta la xiriirta bixinta tilmaan si gaar ah loogu talo galay; tani waxay ku salaysan tahay IEP-ga</p>

	<p>cunugaaga iyo tilmaanta dhammaan ardayda lasiinayo. Xoogaa adeegyo ah lama bixin doono maadaama ardayda dhammaantood aysan heleen heerar gaar ah oo tilmaan ah, taageero iyo adeegyo. Waxaanu sida ugu wanaagsan u samayn doonaa sidii aan taageero usiin lahayn qoysaska waqtigaan aana u bixin lahayn waxqabad, meel loo maro tilmaan iyo taageero si lagu caawiyo.</p> <p>Adeegyo turjumaan oo loogu talo galay shirarka IEP ayaa waxaa lagu heli doonaa taleefan ama fiidiyow, ayadoo taasi ay ku xiran tahay luuqada.</p>
Ardaygeygu waxaa uu dhigtaa fasalada sare ee dugsiga sare; maxaa uu u baahan yahay inuu sameeyo si uu u xaqiijiyo inuu qalin jabiyo sanadkaan?	Waxaanu sugaynaa in maamulka gobolku uu kasoo saaro go'aano si aanu u ogaano tillaabooyinkeena xiga. Waxaan la xiriiri doonaa ardayda dhigata fasalada sare iyo qoysaskooda markii aan taladaas ka helno maamulka gobolka. Hada, waxaanu kula talinaynaa dhammaan ardayda fasalada sare inay la xiriiraan macalimiintooda.
Ardaygeyga ayaa shey uga soo tagay iskoolka. Miyuu aadi karaa iskoolka si uu usoo qaato?	Hada maya. PPS schools wuxuu bilaabay nadiifin aad ah waxaana nadiifinaayay kooxaheena adeegga. Si loo dhimo faafidda coronavirus, uma ogolaanayno ardayda inay soo galaan dhismeyaasha iskoolka waqtigaan. Anagaa usoo sheegi doona ardayda marka ay mar kale soo gali karayaan dhismeyaasha.
Miyay jiri doontaa cawimaad waxbarid ah oo ka baxsan barnaamijka caadiga ah hadii ardaygeygu u baahan yahay cawimaad dheeraad ah?	Haa. Ardaydu waxay la xiriiri karaan bareyaashooda ama la-taliyeyaashooda hadii ay dareemaan inay u baahan yihiin cawimaad.
Miyaa ardaygeyga ama anigu la xiriiri karaa bare ayadoo la joogo waqti aan ahayn waqtiga loo cayimay wax ku barashada internetka?	Haa. Macalimiinta waxaa laga yaabaa inaysan waqtigaas shaqo kujirin laakiin hadii la waco waa qabanayaan taleefanka.
Miyay jiraan waqtiyo go'an oo lagu samaynayo leyliyada?	Bareyaasha ayaa wax u qorsheyn doona hawlhooda waxbaridda waxaana laga yaabaa inay tilmaameyaal u dajiyaan waqtiyada kama dambeysta ah, laakiin waqti kufilan ardayda ayaa xoogga lasaari doonaa markii ay macquul tahay.
Sidee ardaygeygu u ogaan doonaa jadwalka ay tahay inuu raaco?	Bareyaasha ayaa lasoo xiriiri doona ardayda waxbaranaya. Waxbarashada la qaato ayadoo laga fogyahay iskoolka nidaamyada lagu maareeyo ee bareyaasha iyo ardaydu ay isticmaali doonaan ee K-2 waa

	SeeSaw iyo 3-12 oo ah Google Classroom ama Canvas. Ardayda qaba baahiyaha gaarka ah waxaa laga yaabaa inay adeegsadaan nidaam kale. Waa lagu soo sheegi doonaa hadii uu mid kale yahay.
Yaan lasoo xiriiri karnaa hadii cillado farsamo ay naqabsadaan ama caqabado kale oo dhanka ka qeybqaadashada ah?	Taageero toos ah ama (<i>Live</i>) oo internetka ku baxaysa iyo talo ayaa laga heli doonaa barta ardayga ee PPS. Intaasi waxaa dheer, miiska taageerada ee PPS ayaa shaqeyn doona si uu idiinkaga caawiyo wixii dhibaatooyin farsamo ah. Waxaa laga soo wici karaa 503-916-3375 ama email u soo dir support@pps.net .
Miyaa ardaydu usoo laaban karaan iskoolka ka hor inta uusan dhammaan sanad dugsiyeedku?	Anagoo dhan ayaa aad u jeclaan lahayn inaan ku laabano iskoolada. Hada, amarka sare ee Barasaabka ayaa caddeynaya in marka ugu horreysa ee aan ku laaban karno ay tahay Abriil 29. Waan idinla soo xiriiri doonaa oo aan idiin soo sheegi doonaa sida uu Barasaabku ku bixiyo talo dheeraad ah maalmaha iyo asbuucyada soo socda.
Yaan lasoo xiriirayaa hadii aan qabo su'aalo ku saabsan dabeecada isticmaalka internetka ama badbaado?	Sida aad yeelilahaydba waqtiyada kelee sanadka, waxaad lasoo xiriiri kartaa macalimka cunugaaga ama maamuleyaasha adoo weydiin kara su'aalo ama usheegi kara wixii walaac ah oo kusaabsan habdhaqan. Sidey tahay mar kasta, waxaad sidoo kale soo tebin kartaa takoor iyo/ama dhib (sida hadii dad khatka ku jira ay aabyi idiin geystaan) adoo kusoo tebinaya PPS Title IX ama waxaad soo tebin kartaa wixii walaac ah oo aad qabto ama dhib ka dhan ah badbaadada ardayga adoo soo marsiinaya SafeOregon .
Yaan la soo xiriirayaa si aan ugu sheego wax ku saabsan caafimaadka dhimirka ama walaacyo laga qabo badbaadada ama daryeelka cunugga?	Inta faafidda fayrasku socoto, waxaanu dhammaanteen qaadan karnaa dawr si aanu u xaqiijino in carruurta ku qabaan badbaado guryaha. Soo te binta gobolka oo dhan ah ee DHS-ka cunugga waa sii socotaa iyada iyo sidoo kale agabyo badan oo kale oo muhiim ah. Fadlan halkaan ka eeg linkiga liiska guud .